# Goynta Korontada Iyo Gaaska

Heat Shut-Offs

## Maxaa dhici haddii aanan bixin kharashaadka korontada?

**Ogow:** akhbaarta ku qoran warqadan xogta aruursan ah waxaa loogu talagalay dadka tooska u siiya biilkooda, gaaska ama korontadda shirkada kulaylinta. Haddii aad qoladda guriga leh aad gaar u siiso ama haddii aad bixiso mitir la wadaago, eeg warqadayadda xogta aruursan ee *Saacadda Biyaha Iyo Korontada ee La Wadaago*.

Hadii aadan bixin biilka korontada,biyaha iyo kulaylka, waxaa laga yabaa in adeegyadaas lagaa-goosto. Xaaladani waxay dhici kartaa xataa bartamaha wakhtiga qaboobaha. Laakiin inta u dhaxaysa 1 Oktoobar ilaa 30 Abriil waxaad heli kartaa caawimo dheeraad ah oo kaa badbaadinaysa in lagaa gooyo adeegyadan. Xogtan kooban ee warqadan ku qorani waxay khusaysaa adeegyada gaaska iyo korontada hadii loo isticmaalayo shiditaanka kulaylka. Sharciyadani waa ay qabanayaan shirkadaha gaaska iyo korantada ee gaarka loo leeyahay. Waxaa jira sharciyo kuwan la mid ah oo khuseeya shirkadaha dadka ka caawiya kharashka korontada iyo kulayka , iyo shirkadda korontada iyo gaaska ee dawladda hoose leedahay. Sharciyadani ma khuseeyaan shirkadaha shidaalka, dhuxul dhagaxda iyo goobaha xaabada lagu gado.

Waxaad kaloo leedahay wuxuun ah ilaalin uu sharcigu kaa ilaalinayo goynta korontadda haddii aad ku haysato guriga qalab caafimaad oo u baahan in koronto la geliyo. Kuwaasi waxa ay noqon karaan sidda dawo buufiyaha (nebulizer) cudurka neefta loo isticmaalo ama aaladda CPAP ee ay isticmaalaan dadka neeftu qabato kolka ay hurdaan.

## Qorsho sii dejiso Miisaaniyadna ugu talagal

Hadii aad guri cusub u guuraysid, waa inaad sii ogaatid inta biilashaadu noqonayaan si’aad uga hortagtid in adeegyadda lagaa goosto. Inta aadan guriga u guurin waydii qofka guriga iska leh, ama guriga lahaan jiray, ama shirkadda korontada iyo kulaylka inta uu noqonayo biilka korontada iyo kulayka ee gurigu. Kadibna lacag aad biilkaas ku bixin lahayd u qoondee oo meel u dhig. Xasuusnoow in biilka kulaylku uu aad u sareeyo wakhtiga qaboobaha.



Hadii aad guuraysid iyo hadii aad meeshaada deganaanaysidba shirkadaha korontada iyo gaasku waa inay ku siiyaan fursad aad ku dooratid inaad isticmaashid habka miisaaniyada qorshaysan. Qorshahani wuxuu ku siinayaa in biilkaaga loo qaybiyo sanadka dhan oo aad bil walba qiimo isku mid ah bixisid. Qorshahani wuxuu kuu sahli karaa inaad biilka si fudud isaga bixisid. Waydii shirkadda gaaska iyo korontada inay hayaan qorshaha miisaaniyada go’an ah iyo hadii ay kuu sameeyaan inta uu biilkaagu noqon doono.

Hadii sababta u biilkaagu u sareeyaa ay tahay in qofka guriga iska lihi diiday inuu guriga dayactiro, waa inaad qofka guriga leh ku cadaadisid inuu dayactirka loo baahan yahay sameeyo. Bartan internetka booqo si aad u akhridid xogtan kooban *Ka Helida Qolada Gurigu Inay Hagaajiso Wixii Halaysan*.

## Caawimo Raadso

Waxaa dhici karta inaad u hesho caawimaad bixinta biilalkaaga. Waxa aad codsan kartaa caawimaad ah dhanka Gargaarka Tamarta. Waxa ay hal mar oo qur ah ay bixiyaan kharashka korontaadda iyadoo lagu salaynayo dakhligaaga. Waxay kaloo bixin karaan caawimaad degdeg ah oo dheeraad ah si ay u joojiyaan goynta korontadda. Hay'adda Gargaarka Tamartu waxa ay qabataa codsiyadda laga bilaabo bisha Oktoobar 1 deeda ilaa iyo bisha Maaji 31. Kolka aad hesho Gargaarka Tamarta, waxaa dhici kara inaad xaq u yeelato barnaamijyadda lacagta korontadda la yareeyo si aad u dhinto biilalkaaga sannadka intiisa kale.




Si aad u hesho goobta kuugu dhow ee dadka ka caawisa kulaylka iyo korontada waxaad wacdaa xafiiska United way numbarka guud ee gobolka 2-1-1. Sidoo kale fariin qoraal oo aad ku sheegaysid nawaaxiga aad degan tahay ayaad ugu diri kartaa numbarkan 898-211 si laguu caawiyo ama bartan internetka ayaad kala xiriiri kartaa www.211unitedway.org/about-211/somali/.

Waxaa dhici karta sidoo kale inaad awoodo inaad ka hesho caawimaad korontada ah Gargaarka Degdeg ah ee degmada ama Gargaarka Degdeg ah ee Guud. La xiriir xafiiska degmadaada ee gargaarka dadwaynaha si aad barnaamijyadan wax uga ogaatid.

## Hadii Biil Khalad ah Laguu Soo Diro

Hadii aad u malaynayso in Shirkadda korontada iyo gaasku ay biil khalad ah kuu soo direen, isla markiiba waa inaad u sheegtid. Shirkadduna waa waajib inay:

- Inay durbadiiba hubiyaan xaqiiqada jirta
- Inay kuu sheegaan sida ay u baareen iyo waxay iyo ogaadeen iyo
- Inay isku dayaan sidii ay kuula shaqayn lahaayeen si ay dhibta u xaliyaan

**Adeega kaama goyn karaan ilaa ay baaritaan sameeyaan kuuna soo diraan warqad qoraal ah oo ay kuugu sheegayaan waxa uu noqday natiijada baaritaankoodu.**

Hadii aadan weli ku qanacsanayn go'aanka ay gaareen, ka wac:

- xafiiska gargaarka sharciyada (legal aid) ee deegaankaaga 1-(877) 696-6529
- gudiga dadwaynaha ee u qaabilsan korontada iyo gaaska waxaanad ka wacdaa numbarkan (651) 296-0406 ama1-(800) 657-3782
- Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Gobolka Minnesota(651) 296-3353 ama 1-(800) 657-3787

## Hadii Kulaylka- Lagaa gooyo Wakhtiga Qaboobaha lagu jiro

Hadii aad bixin kari waydid dhamaan biilkaaga gaaska iyo korontada inta u dhaxaysa 1 Oktoobar ilaa 30 Abriil ta soo socota, shirkadda korontada iyo gaasku kaama goosan karto adeega hadii aad samaysid qorshe ah inaad biilka si tartiib tartiib ah u bixisid **balantaana ilaalisid**. Marka aad wacdid ee aad la hadlaysid shirkadda korontada iyo gaaska waa inaad qoratid magaca qofka aad la hadashay iyo waxay ku yiraahdeen. Waxaanad u qortaa warqad aad ku sheegaysid qorshaha aad ku heshiiseen. Adiguna nuqul kala hadh. Kharashaadka korontadda ee shirkadaha dowladdu maamusho (sida Xcel ama CenterPoint) kaama rabi karaan inaad ku bixiso in ka badan 10% dakhligaaga korontada xilliga qaboobaha.

Hadii jaa lagaa gooyey kulaylka iyadoo lagu jiro xilliga qabaabaha ah, shirkada korontada waa khasab inay ku dadaasho intii macquul ah inay kuugu soo celiso adeegaaga 24 saac gudahood ka dib aqbalida qorshahaaga lacag bxinta ah

## Ma Aha Inaad Lacag Qaadato Bisha Oktoobar 1 keeda Si aad u Hesho Ka  Ilaalinada Goynta Korontada Xilliga Qaboobaha ah.

Laakiin Sharciga xilliga qaboobaha kaliya waxa uu kaa ilaaliyaa goynta haddii goyntu ay korontada ama gaasku ay saameyso kulaylkaaga. Sharciga xilliga qaboobahu ma quseeyo haddii kharashka kulaylinta gurigu uu ku jiro kiradda, sidda qaar ka mid ah dhismayaasha waaweyn.

Shirkad kasta oo bixisa adeega korontada iyo gaaska, waxaad la geli kartaa heshiis ah inaad si tartiib ah biilkaaga u bixisid:

**Qorshaha biil bixinta**

Waxaad heshiis qorshaysan oo xagga bixinta biilka ah la geli kartaa shirkadda korontada iyo gaaska si aad ugu heshiisaan inay qiima go'an oo aadd bil walba bixisid kuu gooyaan inta wakhtiga qaboobaha lagu jiro. Qiimaha biilka ee aad bixinaysaa wuxuu noqon karaa wax ka yar biilka lagugu soo dalacay. Qiimaha aad bixinaysaa waa inuu yahay mid macquul ah marka la fiiriyo dakhligaaga ku soo gala. Adeega lagaama goynayo hadii aad biilka bixisid wakhtigii aad ku heshiiseen. Hadii aad bixin kari waydid qiimihii aad ku heshiiseen waa inaad wacdid shirkadda korontada iyo gaaska si aad qorshe cusub u wada gaartaan.



Dhamaan shirkadaha korontada iyo gaaska ee dawladdu sharcigooda dejisay shirkadaha(sida Xcel ama CenterPoint) adeega kaama goyn karaan hadii aad ku bixisid 10% oo dakhliga bishii ku soo gala ah biilka korontada iyo gaaska:

**Qorshaha 10%**

Lagaama goyn doono korontada bil walba oo aad ku bixiso ugu yaraan 10% dakhligaaga biilka korontada. Caawimada lagaa caawiyo biilka korontada iyo,gaaska iyo looma xisaabinayo inuu yahay dakhli ku soo galay. Hadii aad laba shirkadood oo kala duwan midna gaaska ka heshid midna korontada 10% ka waxaaa loogu kala qaybinayaa laba isle'eg.

## Xadidayaasha adeega

Shirkadaha bixiya adeega korontada iyo gaasku waxay leeyihiin qalab la yiraahdo "xadidayaasha adeega" kuwaas oo xadidaya inta uu noqonayo gaaska iyo korontada aad helaysaa. Xilliga qabaabaha, shirkaddu korontadu waa KHASAB inay u hogaansanto xeerarka:

- Waa inay ku sii ogaysiiyaan inay qorshaynayaan inay geliyaan gurigaaga adeeg koobe
- waa inay ku kala dooransiiyaan labada hab 1 ama 2 ee kor ku qoran habka aad biilka u bixinaysid.

Hadii ayna sharciga raacin taas macnaheedu waa sharcigii ayay jebiyeen. Waxaad wacdaa xafiiska qareenada dadka caawiya ee 1(8770 696-6529, iyo Gudiga dadwaynaha ee u qaabilsan korontada iyo gaaska (PUC) waxaanad ka wacdaa halkan (651) 296-0406 ama 1-(800) 657-3782.

## Rafcaan qaadashada

Hadii aanay shirkadda gaaska iyo korontada ay kuu samayn waayaan qorshe macquul ah oo aad biilka ku bixisid waxaad racfaan u qaadata Gudiga dadwaynaha ee u qaabilsan korontada iyo gaaska (PUC). Si dedeg ahna racfaanka u qaado-waayo wakhti badan ma haysatid. Sidoo kale waxaad wacdaa xafiiska qareenada dadka caawiya si'ay kuu caawiyaan ee 1-(877) 696-6529.

Sida rafcaanka loo qaato:

- Shirkadda korontada iyo gaaska waxaad waydiisataa inay ku siiyaan foomka rafcaanka lagu qaato. Hadii ay ku siin waayaan waxaad wacdaa xafiiska PUC foomkana iyaga ka soo qaado ( akhri qoraalka hoose). Foomka buuxi kadibna waxaad u dirtaa xafiiska PUC. Waa inuu foomku muddo 7 maalmood gudahood ah oo laga soo tirinayo maalintii aad heshay ogaysiiska ah in adeega lagaa jarayo ku gaaro xafiiska PUC.

- Xafiiska PUC waxay muddo 30 maalmood gudaheed ah kuu dejinayaan qorshe aad si tartiib tartiib ah ugu bixinaysid biilkaaga. Adeega lagaama goyn karo inta aad hawlaha rafcaanka ku gudo jirtid.

## Hadii Dakhligaagu Is Badalo Ka Dib Markaad qorshaha Ku Heshiiseen

Hadii xaaladi kula soo deristo oo aadan haysan lacag aad ku bixisid qiimihii aad ku heshiiseen, la xiriir shirkadda korontada iyo gaaska **isla markiiba** si'aad qorshaha u badashaan. Hadii shirkadda korontada iyo gaasku diido in qorshihii hore wax laga badalo, durbadiiba waa inaad rafcaan qaadatid oo aad u dirtid xafiiska PUC si'aad uga hortagtid in adeega lagaa goosto.

Xafiiska PUC waxaad kala xiriiri kartaa PUC halakn:

Minnesota PUC
121 7th Place East, Suite 350
St. Paul, MN 55101

(651) 296-0406 or 1-(800) 657-3782

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**